



HAMILTON-
WENTWORTH
DISTRICT
SCHOOL
BOARD

Safe & Caring SCHOOLS

3

HANDADAADDA (XOOG-U-SHEEGASHADA)

Macluumaadka loogu talagalay Waalidiinta iyo Ardayda

Guddiga Degmada Dugsi Hamilton-Wentworth ayaa u heelan sidii ay uga dhigi lahayd mid kasta oo ka mid ah dugsiyadeeda meel daryeel leh oo badbaado u leh waxbarashada.



www.hwdsb.on.ca/programs/safeschools

ALL STUDENTS ACHIEVING THEIR FULL POTENTIAL

Tusmada Buugga

Waa maxay Handadaaddu?.....	3
Noocaca Dhaqanka Handadaadda?.....	3
Waxa lagu kaco haddii ilmahaaga la handado.....	4
Waxaad ku kacayso haddii u ilmahaagu handadaad sameynayo.....	5
Waxaad ku kacayso haddii u ilmahaagu ag-jooqe handadaad dhacaysa yahay.....	5

Macluumaad Dheeraad ah

Jawiga Qumman ee Dugsi.....	6
Xeerka Anshaxa	6
Ilaalinta Ammaanka Carruurteena ee Dugsiga (Sharciga 157)	6
Guddiga Ammaanka Dugsiga	6
Iskaashiga lala sameeyo Hay'adaha Beesha.....	6
Qanimaadka Dheeraadka ah ee loogu talagalay Waalidiinta	7

Arday kasta ayaa ku habboon inuu badbaado dareemo oo u ku helo dugsiga dhexdiisa, meesha dugsiyaal, baska dugsiga, iyo dhacdooyinka iyo waxqabadyada dugsiga marka la joogo. Markaan nahay Guddiga Degmada Dugsi ee Hamilton-Wentworth (HWDSB), annagu waxaan ognahay in ammaanku muhiim u yahay waxbarashada wanaagsan. Ardayda iyo macallimiinta ayaa waxbarashada iyo wax u dhigitaanka guul ka soo hooya markay dugsiyadu ammaan yihiin. Haddii ardaygu anshax-xumaado, maamulaha dugsi ayaa go'aaminaya waxa tallaabooyin ah ee u ka qaadi doono ardayga sidii looga caawin lahaa ardayga inuu horumariyo anshaxiisa/eeda.

Anshaxa qaarkiis ayaa micnihiisu yahay inuu ilmuhu handadaad ku kacayo.



Waa maxay Handadaaddu?

Handadaaddu waa hab u dhaqan sida caadiga soo noq-noqod, joogto, iyo xadgudub leh oo lagula dhaqmo shaqsi ama shaqsiyaad looguna talagalay inay u horseeddo, (ama la ogsoon yahay inay u u horseeddo), cabsi iyo saxariir iyo/ama waxyeello oogada, dareenka, isku-kalsoonida, ama magaca sharafta qof kale. Handadaaddu waxay ka dhacdaa meesha ay ka jirto isku-dheelli-tirnaan la'aan awood dhab ah ama loo maleeynayo.

- Ardayda handadaadda sameeyaa ayaa isticmaala awood ay ku kantroolaan oo ay ku saxariiriyaan kuwa kale.
- Ardayda la handado ayaa noqoda bilaa awood sii kordheysa dabadeedna noqda dad dabin ugu jira cilaaqaadka iyaga lagu tacadiyayo.
- Ardayda ayaa u isticmaasha awoodda siyaabo badan:
 - ▶ Le'kaanshaha, xoogga, caqliga, da'da
 - ▶ Heerka bulsheed
 - ▶ Heerka dhaqaale
 - ▶ Aqoonta jijileeca qofka kale
 - ▶ Xubin ahaanta koox qaalib ah

Noocaca Dhaqannada Handadaada

Oogo ahaan: Ku dhufasho noq-noqod leh, laagid, rixiitaan, garaac, xaditaan, ama burburinta hantida qofka kale

Hadal ahaan: Cay, ka maadsasho, sharaf tiritaan, foorjayn, hanjabaad, faallooyin sinji nacayb leh, iyo dhibaataaynta siku-tagga soo noq-noqod leh

Bulsho ahaan: Indho leex-leexin, ka reebitaanka kuwa kale kooxda, xamashada, ka faafinta ku-tiri-ku-teynta, ka dhigitaanka qofka ama dadka kale inay doqmo u ekaataan, iyo burburinta saaxiibtinamadiisa qofka kale oo soo noq-noqod leh

Elektiroonigga/Kombiyuuterka: Istimaalka soo noq-noqodka badan leh ee email-ka, taleefan gacmeedka, tekiska, internet-ka iyo goobaha internetka si qof loogu hanjabo, dhibaateeyo, yaxxaxsiyo, bulsho ahaan lagu faquuqo, ama loo burburiyo magaca sharafta qof kale iyo saaxiibtinamada qofka kale

Jinsiyad ahaan:

- Weerarka, faquuqa, ama faallooyinka aan qummanayn ee soo noq-noqodka ee lagu wajaho qofka ama dadka sababta oo ah ka soo jeedkooda sinjiyeed ama qowmiyadeed ama caadooyinka dhaqameed
- Magaac ugu yeerka soo noq-noqodka leh ee qofka ama dadka, ama ka maadeysiga sinjiyaddooda ama qowmiyadeed ama caadooyinka dhaqameed.

Diin ahaan:

- Weerarka, faquuqa, faallooyinka aan qummanayn ee soo noq-noqodka ee lagu wajaho qofka ama dadka sababta oo ah ka soo jeedkooda aamminka diineed, xeerka lebbiska, ama sinjiyeed ama xusitaannada;
- Ku caayitaanka magacyo qof ama dad ama ka maadeysiga aamminka diintooda soo noq-noqodka leh, ka soo jeeditaankooda, xeerka lebbiska, ama xusitaannada.
- Isku-tagga (Galmada):

Isku-tagga (Galmada):

- Si noq-noqod leh iska dhaafka qof ama dad ama ula dhaqankooda sida xun sababta oo ah lab/dheddiga ahaantooda dookhooda isku-tagitaan;
- Si noq-noqod oo ka bixin faallooyin aan habboonayn oo ku saabsan qofka ama dadka ee dabcigooda isku-tag;
- Si noq-noqod oo ka bixin faallooyin labta ama dheddiga loola jeedo ama kaftan, taabasho, ama u qabsasho hab isku tag; loola jeedo;
- Si noq-noqod leh u faafinta kuri-ku-teenta isku-tagga ee ku saabsan qof ama dadka;
- Si noq-noqod leh qof ama dad ku caayitaanka khaniis, khaniisad, ama magaac kale oo aan habboonayn.

Naafanimada:

- Si noq-noqod leh ka reebitaanka ka qayb-galka qof arrimo, ama si xun ula dhaqanka maadama ay naafanimo, jirto naafanimo loo maleeyo, ama u baahni waxbarashada gaarka ah lahaanta;
- Si noq-noqod leh ka faalloonta ama foorjeynta qof ama dad leh naafanimo wax loogu dhimayo.

Macluumaadka ku saabsan ujeedooyinka handadaada HWDSB iyo Tilmaamaha Ujeedooyinka fadlan booqo bartayada internerka ku taal www.hwdsb.on.ca/aboutus/policies

Waxa lagu kaco haddii ilmahaaga la handado:

- La hadal ilmahaaga si aad macluumaad iyo wax faham dheeraad ah uga hesho noloshooda;
- Maqal sifeynta maalinta ay soo mareen, oo ay ku jirto tagitaanka iyo ka imaadka dugsiga iyo dhacdooyin kasta oo ka dhacay dugsiga;
- La hadal macallinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga haddii aad u melyso ilmahaaga in la handadayo;
- Ku dhiirri-gali in ilmahaaga inuu u sheego qof qaan-gaar oo la aaminsan yahay oo ka

- caawin kara joojintada handadaadda;
- Ku dhiirri-gali in ilmahaagu madax bannaanaado, oo isku day inaad ilaalinta ka sii badin;
- Bar ilmahaaga sida saaxiibbo cusub loo samayesto, looga feejignaado agagaaraha iyo haladayg loo yeesho;
- Ku dhiirri-gali waxqabayada wakhtiga firaqada oo sare u-qaada isku-kalsoonida;
- Raadi caawimo haddii aad ka welwelsan tahay arrimaha ku saabsan caafimaadka dhimirka ilmahaaga.

Talooyinka loogu talagalay waalidiinta: Booqo bartayada internetka oo ku taal, www.hwdsb.on.ca/programs/safeschools si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaad ku kacayso haddii u ilmahaagu handadaad sameynayo:

- Dhibaatada ha dhayalsan;
- Kala hadal ilmahaaga arrimaha ku saabsan dabeecadda, adiga oo maskaxda in carruurta ilmaha handada badiyaa eedda dul saaraan ku kale;
- U-sheeg ilmahaaga inaad aqabalayn anshaxa sidaas oo kale ah oo u diyaar garee cawaaqib aan gacan-qaad lahayn oo ku habboon darnaanta waxa u ilmahaagu ku kacay;
- Kal hadal saamaynta anshaxani ku yeeshay dadka kale;
- Waa inaad ku ammaantaa, ama aad tustaa naxariis dadka kale si aad u tusto inaad qiimeeyso anshaxa qaddarinta leh;
- Bar dariiqooyinka lagu xalliyo khilaafka iyo aan la isticmaalin ereyo ama ficilo waxyeello leh;
- Ha u oggolaan inay goob-joog ka noqdaan ansha waxyeellada leh ee ka dhex dhaca xubnaha qoyska;
- Wakhti la qaado ilmahaaga, khaasatan Wakhti la qaado ilmahaaga, khaasatan markaad ku guda jirtaan waxqabayada iyo ka fogaanshaha tusaalooyinka wayeellada iyo weerarka leh ee ka jira warbaahinta;
- Kordhi kormeerkaaga markuu ilmahaagu asxaabta la joogo oo ka ilaali saaxiibtinimada leh asaagga dagaalka leh;
- La hadal macallinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga haddii aad u maleyso in ilmahaagu ay dhibaato ka haysato qaadashada mas'uuliyadda anshaxiisa/eeda;
- Raadi caawimo haddii aad ka welwelsan tahay arrimaha ku saabsan caafimaadka dhimirka ilmahaaga.

Waxaad ku kacayso haddii u ilmahaagu ag-jooge handadaad dhacaysa yahay:

- Bar iayagu inay u naxaan dhibbanaha (sidii loo fahmo dareenka u dhibbanuhu leeyahay);
- Ka caawi sidii ay u fahmi lahaayeen inuu jiro faraag u dhexeeya anshaxyada "maakhadeynta" iyo "Warbixinta";
- U raac oo arag macallinka ama maamulaha dugsiga sidii aad uga warbixin lahaydeen wixii ay arki lahaayeen;
- Bar ilmahaaga inuu kala qaybgalo kuwa kale sidii ay uga ilaalin lahayeen ilmaha la handadayo;

- U faahfaahi saamaynta bulsheed ee muddada dheer ay ku yeelan doonto ilmaha la handado haddii handadaadu joogsan weydo;
- Ku dhiiriigali ilmahaaga inuu saaxiibbo xurmeyn iyo naxariis leh u yeesho oo iska joojiyo xiriiryada dadka dhibaata u horseeda;
- Tusaalee waxa naxariista iyo dhiirintu tahay.

Macluumaad Dheeraad Ah

Jawi Dugsi oo Qumman

Jawi dugsi oo qumman ama habboon ayaa jira marka dhammaan xubnayaasha beesha dugsi dareemaan badbaado, kalsooni, iyo soo-dhawyn. Dhammaan dugsiyada ayaa horumariya barnaamijyo taageera anshaxyada qumman oo muujinaya mashaaricda horumarka tacliinta dabciga ee Guddiga Degmada Dugsi ee Hamilton-Wentworth.

Xeerka Anshaxa

Xeerka Anshaxa, oo soo koobaya ka filitaannada iyo mas'uuliyadaha shaqaalaha, ardayda, waalidiinta, iyo booqdayaasha, ayaa laga heli karaa dugsi kasta. Xeerka Anshaxa guddiga ayaa laga heli karaa internetka barta ku taal www.hwdsb.on.ca/programs/safeschools

Ilaalinta Ammaanka Carruurteena ee Dugsiga (Sharciga 157)

Shaqaalaha guddiga ee ula shaqeeya sida tooska ah ardayda ayaa looga baahan yahay inay ka jawaabaan dhacdooyinka laga yaabo inay ku yeelato saamayn aan qummanayn jawiga dugsiga. Dhammaan shaqaalaha ayaa looga baahan yahay inay u warbixiyaan maamulaha dugsi haddii ay ogaadaan inuu arday ku kacay xaraakaad ay tahay in ardayga loogu qaddariyo in lala beegsado ka hakin ama eryitaan dugsi. Handadaada ayaa ayaa ka mid ah anshaxyada loo qaddariyo ka-hakinta dugsiga. Mamulayaasha dugsi la xiriiri doona waalidiinta dhibbanayaasha dhacdooyinkaas oo kale.

Guddiga Ammaanka Dugsiga

Dugsi kasta ayaa leh Guddi Ammaan Dugsi. Guddiga Ammaanka Dugsi ayaa isticmaala xogta la xiriirta anshaxyada handadaada sidii ay ugu kormeeri lahaayeen oo ay dib ugu eegi lahaayeen saamaynta barnaamijyada ilaalinta handadaada dugsi. Xagta ayay ku jiri karaan macluumaadka ra'yi-uurinta ammaanka dugsi, xogta hakinta iyo eryitaanka, faallooyinka arday, ra'yi dhiibashada waalid, iwm.

Iskaashiga lala sameeyo Hay'adaha Beesha

Guddiga Degmada Dugsi ee Hamilton-Wentworth ayaa si firfircoon raadisa iskaashiga beesha ka caawin doonta dugsiyada iyo beelaha sidii ay uga shaqayn lahaayeen baabi'inta handadaada ka jirta dhammaan agagaaraheena.

Qanimaadka Dheeraadka ah ee loogu talagalay Waalidiinta

Waxaad kala xiriiri kartaa maamulaha Dugsi iyo Maamule Ku-Xigeenka dugsiga ilmahaaga. Waxaad u wici kartaa Kormeeraha Guud ee dugsigaaga.

La talin dheeraad ah waxa laga yaabaa in laga helo kuwa soo socda:

- Dhakhtarka Qoyska
- Kala xiriir Hamilton 905-570-8888 ama info@contacthamilton.ca
- La tashi dugsiga iyo shaqaale bulsho
- La tashi kala-taliye waxbarasho-cilmi-nafsi
- Macluumaadka ayaa laga heli karaa shaqaalaha dib-u-dejinta dugsiyada, oo kaa caawin inay fudeydiyaan wada xiriirka dugsi-guri oo ah hab dareen-dhaqameed leh, iyo waliba ka caawinaya u-diritaanka iyo marinka qaniimaadka beesha.

Macluumaad dheeraad ah oo ku yaal internetka ayaa laga heli doonaa:

- www.bullyfreehamilton.ca
- www.PrevNet.ca
- www.maccura.ca
- Maktabadda Dadweynha Hamilton: www.hpl.ca
- Wax Ka Wada-Qabadka Badbaadada Dugsiyada Kanada: www.canadiansafeschools.com
- Wasaaradda Waxbarashada: www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/publications.html

Fadlan ogsoonow: Buug-gacmeedkan waxa loogu talagalay ujeeddoyinka macluumaadka. Kuma habboona ama looguma talagalin inay noqoto talo sharciyeed.



Safe & Caring SCHOOLS 3

TAXANAYAASHA BUUG-GACMEEDKA AMAANKA IYO DARYEELKA:

1. Xeerka Anshaxa
2. Edbinta Tallaabooyinka leh
3. Handadaadda (Xoog-U-Sheegashada)
4. Ka-Hakin Dugsi
5. Ka Eryitaan
6. Marinka
7. Lebbiska Habboon
8. Hubinta Imaadka Ammaanka leh



**HAMILTON-
WENTWORTH**
DISTRICT
SCHOOL
BOARD

Hamilton-Wentworth District School Board
100 Main Street West
Hamilton, ON L8P 1H6
905-527-5092

www.hwdsb.on.ca/programs/safeschools

ALL STUDENTS ACHIEVING THEIR FULL POTENTIAL